

Suurat Quraysh
سُورَةُ الْقُرَيْشِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Caadaysigii Quresheed.
2. Ay ka caadayeesheen Safarka Xagaaga iyo Jiilaalka darteed.
3. Ha u caabudeen Eebeha Beydkan (Kacbada).
4. Eebahii ka quudiyay gaajo, kana aamingaliyay cabsi.

لَا يَلْفِيفُ قُرَيْشٍ ①

إِلَّا لِفْهِمِ رِحْلَةَ الشِّتَاءِ وَالصَّيْفِ ②

فَلْيَعْبُدُوا رَبَّ هَذَا الْبَيْتِ ③

الَّذِي أَطْعَمَهُمْ مِنْ جُوعٍ وَءَامَنَهُمْ

مِنْ خَوْفٍ ④

Eebe isagaa abuuray Dadka isagaana quudiya, halkanna wuxuu ku mannaystay oo xusuusiyay Quraysh-tii Ree Makaad siduu Eebe ugu nicmeeyay, taasoo ah inuu kulmiyay, baahina ka quudiyay, cabsina ka nabadgaliyay, si ay Eebe ugu mahad-naqaanna ay waajibtahay inay caabudaan, Ruuxii Eebe u nicmeeyana Shukrigeedaa ku waajib ah. Rasuulkii Eebana «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eeba ha yeelee» wuxuu akhriyay Suuraddan markaasuu yidhi: magaciin Ba'qureysheey caabuda Eebaha Beydkan idinka quudiyay gaajo idinkana aamin yeelay cabsi. Quraysh (1-4).

Suurat Al-Maacuun
سُورَةُ الْمَاعُونِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Ka warrama kan beenin Abaalmarinta (Qiyaamada).
2. Kaas xooga Agoonta (xaqeeda).
3. Aan kuna boorrinaynin quudinta miskiinka.

أَرَأَيْتَ الَّذِي يُكَذِّبُ بِالذِّكْرِ ①

فَذَلِكَ الَّذِي يَدْعُ أَيْتِمَ ②

وَلَا يُحِصُّ عَلَىٰ طَعَامِ الْمِسْكِينِ ③